

Xaashida Xogta Shaqaalaha ee Qaabka Magdhowga Shaqaalaha Minnesota

Minnesota workers' compensation system employee information sheet (Somali)

Maxuu ceymiska shaqaaluhu ku bixiyaa magdhow?

- Daaweynta dhaawac kugu gaaray shaqada, haddii uu yahay mid caqligal ah islamarkaana lagama maarmaan ah.
- Xaq-bixinta mushaar kaa lumay oo dakhligaaga ka mid ah (saddex maalmood ka dib ayaa xaq-bixintaasi billaabanaysaa).
- Xaq-bixinta dhaawac joogta ah ama curyaamid (hawlgab) ku dhaca xubin jirkaaga ka mid ah.
- Xaq-bixinta la siinayo xaaskaaga ama/iyo caruurta iyo ciddii kale oo ka tirsan guriga haddii aad ku geeriyooto dhaawac kugu gaaray shaqada.
- Adeega dib-u-habeynta iyo dib u tababaridda haddii aadan dib ugu noqon karin shaqadii aad haysay intaadan dhaawacmin ama aadan dib ugu noqon karin hay'addii aad u shaqayneysay intaadan dhaawacmin.

Sidee loo bixiyaa xaq-celinta maqdhawga shaqaalaha?

Xaq-celinta magdhowga shaqaalaha waxaa bixiya shirkada caymiska ama cida aad u shaqeeyneyso, haddii loo shaqeeyuhu iskiis isku ceymiyay. Shuruucda gobolka ayaa qeexaya heerka xaq-celinta. Fadlan waxaad ogaataa: iyadoo la tixraacayo qaanuunka, shirkadda caymisku waxay la soo bixi kartaa xogta caafimaadka ku saabsan dhaawaca shaqada kugu soo gaaray iyadoo aan ogolaansho lagu weydiin.

Haddii shirkadda caymisku aqbasho qaansheegadkaaga ku saabsan xaq-celinta mushaar kaa lumay oo aad adiguna hawlgab ahayd muddo saddex maalmood ah:

- Shirkadda caymisku waxay kuu soo diraysaa koobi (nuqul) ah foomka *ogeysiiska shirkadda caymiska ee tifaftirka sheegashada hore*, kaasoo sheegaya in dalabkaagii la ogolaaday.
- Shirkadda caymisku waa inay bilaawdaa bixinta xaq-celinta mushaar kaa lumay muddo 14 maalmood gudahood laga billabo maalinta loo shaqeeyuhu ogaado dhaawaca kaa soo gaaray shaqada iyo mushaar kaa lumay. Shirkada caymiska waa inay xaq-celinta ku bixisaa waqtiga iyo taariikhda loogu talagalay. Xaq-celinta waxaa lagu siinayaa wakhtigii aad qadan jirtay mushaar kaa lumay.

Haddii caymiyuhu diido xaq-bixinta mushaar kaa lumay:

- Caymiyuhu wuxuu kuu soo dirayaa koobi (nugul) ah foomka *ogeysiiska caymiyaha ee tifaftirka sheegashada hore*, kaasoo cadeyneya in sheegashadaadii hore la diiday. Foomku waa inuu si cad u qeexaa sababta keenay in caymiyuhu rumeeyo in dhaawaca ama xanuunka uusan kaa soo gaarin shaqada.
- Haddii aadan ku raacsanayn diidmada, waa inaad la hadashaa sarkaalka caymiyaha ee uga shaqaynaya qaansheegadkaaga shirkadda caymiska, sidoo kale hay'addaad u shaqeeyso caymiskeeda waa ay kaaga jawaabi kartaa su'aalaha ku saabsan qaansheegadka.

Magaca caymiyaha:

Taleefonka:

- Haddii aadan ku qancin jawaabaha caymiyaha aadna weli ku diidan tahay diidmada, waa inaad la xiriirtaa Waaxda Shaqada iyo Warshadaha taleefonnada hoos ku yaalla si aad u go'aansato talaabada labaad ee aad qaadi lahayd.

Haddii aad qabto su'aalo kale ama aad u baahan tahay caawimaad kale, waxaad wacdaa Waaxda Shaqada iyo Warshadaha iyo Taleefonka Warbixinta ee loogu tala galay Magdhowga Shaqaalaha oo ah:

Magaalooyinka mataanaha iyo koonfurta Minnesota: **(651)284-5005 ama 1-800-342-5354; TTY (651)297-4198**

Duluth iyo Waqooyiga Minnesota:

(218) 733-7810 ama 1-800-342-5354

Waxaa taleefonka ka jawaabaya xirfadlayaasha magdhowga shaqaalaha oo waayo-arag ah. Waxay ku siinayaan **warbixin deg-deg ah oo sugin iyo caawimaad**. Waxii akhbaar kale oo dheeraad ah oo ku saabsan magdhowga shaqaalaha waxaad ka heleysa bogga wasaaradda ee internetka: <http://www.dli.mn.gov>

Sharciga wuxuu qabaa in hay'adda aad u shaqeyso ku siiso warbixintan. Qoraalkan waxaad ku heleysa qaabab kala duwan sida farta waaweyn, farta indhoolayaasha, ama cajalado la dhageysto ama adoo waca taleefonnada kor ku qoran.

Waxaa la qoray bisha Agoosto 1, 2001. Foomkan waa la daabacan karaa, waana la bixin karaa.

Ha ku darin foomkan faylka aad u direyso wasaaradda.